Seniors Rights Victoria

Haddii adiga ama qof aad taqaan si xun loola dhaqmo, kawac Seniors Rights Victoria:

1300 368 821

Seniors Rights Victoria (SRV) waxay caawimaad siisaa dadka da'da ah ee si xun loola dhaqmo. Adeegyada waxaa ka mid ah:

- Khadka caawinta ee telefoonka. Waxaad fariin cod ah u reebi kartaa SRV. Waa laguugu soo celin doonaa.
- Taageero iyo macluumaad lacag la'aan ah
- Talo sharci oo lacag la'aan ah

Talo aad lacag la'aan ku helayso waxkastana ay sir kuu yihiin oo loogu talagalay dadka ka weyn 60 sano

Halka aad ka heli karto caawimo iyo talo

Haddii adiga ama qof aad taqaan si xun loola dhaqmo, adeegyadani waa lacag la'aan qof kastana sirtooda waa loo xafidayaa si dadka oo dhan ay u isticmaalaan.

Elders Rights Australia
1800 700 600
Macluumaad, u doodid iyo taageero

Office of the Public Advocate
1300 309 337
Talobixin ku saabsan ilaalinta/masuuliyada, maamulka iyo dardaaran-qorista qareenka

Carers Victoria
1800 514 845
Talo iyo taageero loogu talagalay daryeelayaasha

Victoria Police 000
Haddii adiga ama qof aad taqaan uu ku sugan yahay xaalad aan ammaan ahayn ama nafta halis gelinaysa

Interpreter **13 14 50**

Haddii aad u baahan tahay turjubaan, wac Adeegga Turjubaanka ee Taleefanka (Telephone Interpreter Service - TIS) oo usheeg inay af Talyaani kugula hadalsiiyaan Seniors Rights Victoria.

VICTORIA

©2025 Ethnic Communities' Council of Victoria
www.eccv.org.au

Somali | Soomaali

eccv
The Voice of Multicultural Victoria

Sharaf iyo ixtiraam

Maxaa dhaca marka xiriirka kaala dhaxeeya qoyska uu xumaado

Dhammaanteen waxaan xaq u leenahay in nala ixtiraamo marka aan duqowno.

Dhaqamada dhibaatooyinka keeni kara iyo dhaqamada qofka amnigiisa halista gelin kara maaha mid la aqbali karo, haday noqon lahayd qoysaska ama bulshada dhexdeeda.

Ma aha in aad keligaa waxaas oo dhibaato ah martaa, caawimo ayaa laga heli karaa meel ka baxsan qoyska.

Caawimo iyo taageero ayaad heli kartaa si aad u soo ceshato sharafta iyo ixtiraamka.

Sheekooyin ay bulshada nala wadaagtay

Gabadha aan abtiga/adeerka u ahay waxaan ku aaminay inay lacagtayda maamusho, laakiin si qarsoodi ah ayay u xadday. Waxaa igu adkaatay inaan iska bixiyo biilasha aana daboolo baahiyaha maalinlaha ah. Aad bay iigu adkaatay, dareenkan ah in qof aan ku kalsoonaa uu i khiyaano ayaa murugo igu heyso.

Wiilka aan soddogga u yahay ayaa iga hor istaaga inaan arko carruurta aan awoowaha/ayeeyada u ahay, tanina waxay jabisay qalbigayga.

Baabuur ma kaxayn karo, sidaas darteed ayaan gabadheyda ugu soo iibiyay baabuur si ay u isticmaasho, ayna iigu geyso balamaha aan dhakhtarkayga la leeyahay, hawlaha bulshada iyo dukaamaysiga. Hase ahaatee, way diiday inay meelna ii kaxayso. Waxaan dareemayaa niyad jab iyo inaan waxba sameyn karin. Way adag tahay marka xubin qoyskayga ahi iga faa'iidaysto oo uu dayaco baahiyahayga.

Baahiyaha iyo badqabka dadka da'da ah ayaa muhiim u ah sida kuwa dadka kale ee qoyska ka tirsan. Qaar ka mid ah waayeelka ayaa la kulma cagajugleyn iyo xadgudub oo kaga yimaada dadka ay is yaqaanaan ayna ku kalsoon yihiin.

Dhaqan xumadu waxay leedahay qaabab badan. Waxay u saameyn kartaa qofka da'da ah dhaqaale ahaan, shucuurtiisa ama wanaaggiisa jireed.

Dhaqan xumadu waxay noqon kartaa mid loo sameeyo si ula kac ah. Waxa kale oo ay dhici kartaa marka dadku aanay fahansaneen sida dhaqankoodu uu xushmad darro ugu yahay ehelkooda.

Dhaqan xumada ayaa lagula kici karaa qof kasta iyadoon loo eegayn lab ama dheddig, dhaqan ama diin.

Marka uu qof qoyska ka tirsan ama saaxiib ula dhaqmo si xun qof waayeel ah, waxaa jira gargaar qarsoodi ah oo la heli karo.